**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOMALIA**

**HABKA SOO GUDBINTA CABASHADA EE MASHRUUCA**

# Mashruuca Adkeysiga Biyaha Soomaaliya ee Barwaaqo (P177627)

## Wasaarada Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED)

# KANNAALLADA CABASHADA

| EMAILS | LOCATION | REMARKS |
|---|---|---|
| **FGS Main Channels** | | |
| 0614444803 | FGS level | Emailka Cabashooyinka Mashruuca |
| Barwaaqo.grm@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv@gmail.com | FGS level | Cabashooyinka la xiriira Tacaddiyada k a dhanka ah dumarka |
| **JUBALAND STATE** | | |
| Numberka gaaban 2308 | Juballand State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| Barwaaqo.grm.jubaland@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv.jubaland@gmail.com | Juballand State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| **SOUTHWEST STATE** | | |
| Numberka gaaban 459 | Southwest State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| Barwaaqo.grm.swss@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv.swss@gmail.com | Southwest State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| **HIRSHABELLE STATE** | | |
| Numberka gaaban 2430 | Hirshabelle State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| Barwaaqo.grm.hss@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv.hss@gmail.com | Hirshabelle State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| **Galmudug STATE** | | |
| Numberka gaaban 2309 | Galmudug State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| Barwaaqo.grm.gss@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv.gss @gmail.com | Galmudug State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| **Puntland STATE** | | |
| Numberka gaaban 312 | Puntland State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |
| Barwaaqo.grm@gmail.com<br>Barwaaqo.gbv@gmail.com | Puntland State of Somalia | Heer Dowlad Goboleed |

## 1. WACIYIGELIN

Ogeysiis kor u qaadista sida iyo meesha lagu soo gudbiyo cabashooyinka ee mashruuca Barwaaqo ayaa lagu fulin doonaa heerarka bulshada, FMS, iyo FGS si loo gaaro dhammaan daneeyayaasha, sida ku xusan qorshaha ka qaybgalka daneeyayaasha. Tani waxaa lagu gaari doonaa iyada oo la adeegsanayo boorar, warqado, iyadoo lagu soo bandhigi doono meertada/website ka sida ugu haboon. Maareynta cabashooyinka (GM) waa in ay u furan tahay dhammaan dadka/daneeyayaasha, oo ay ku jiran kuwa aan isticmaalin tiknooloojiyadda, waxbana aan akhriyi karin, ama kuwa nugul ama la dhibaateeyay.

## 2. HORDHAC/DULMAR

Habka cabashada (GM), waa xidhmo muhiim ah oo ka tirsan hanaanka ka qaybgalinta daneeyayaasha iyo sii deynta/qaybinta xogta. Waa hab ay daneeyayaashu ku falcelin karaan, kuna sheegi karaan waxa la quman, wakhtiga ku habboon. Masuuliyadda Mashruuca BARWAAQO ee ee xallinta cabashada waxaa xalinteeda iska leh, Wasaaradda Qorsheynta, maalgashiga iyo hormarinta dhaqaalaha ee DFS. Hawlaha mashruucan waxa ay wasaaraddu u fulin doontaa, si waafaqsan shuruucda DF iyo heerarka Deegaanka iyo Bulshada (EFSSs) ee uu dejiyay Bangiga Adduunka.

**2.1** **Habka xallinta cabshada** ayaa muhiim u ah ka jawaabida cabashooyinka bulshada, sidoo kalena wuxuu ka caawinayaa in la helo jawaab celin ku saabsan mashruuca Barwaaqo. Tani waa shuruud ka mid ah dhammaan mashaariicda ay bixiyaan Bankiga Adduunka, waxeyna masu’uuliyad ka saarantahay dhamaan shaqaalaha Mashruuca.

**2.2** Waxa la doorbidayaa in cabashooyinka si toos ah ee ugu sarreeyso lagu xalliyo, si kastaba ha ahaatee, waa in la heli karaa heerar iyo kanaallo kala duwan oo lagu diiwaan geliyo cabashooyinka, si qof kasta oo nugul kana mid ah bulshada uu udareemo cadaalad marka uu soo gudbinaayo cabashada. Cabashooyinka la xiriira tacadiyada ka dhanka ah dumarka waa in si degdeg ah loogu gudbiyaa kabiiradda uxilsaaran “GBV focal point” ee heer FMS ama FGS.

**2.3** Cabashooyinka waa in si sir ah loo maareeyaa, kaliya dadka u baahan inay ogaadaan ayaa loo sheegi karaa, iyadoo aan laga baqeyn wax dhibaato ah.

**2.4** Cabashooyinka waxaa soo gudbin kara xubnaha bulshada, shaqaalaha, iyo daneeyayaasha kale ee la xiriira fulinta mashruuca, oo ay ku jiraan saameynta taban ee xaaladaha bulshada ama deegaanka, isticmaalka khaldan ee lacagaha; hab-dhaqanka shaqaalaha, xaaladaha ama badbaadada shaqaalaha, tayada adeegga, isir-xumeyn iyo xadgudubka shaqaalaysiinta khasabka ah ama carruurta iwm.

2.5 **Xakameyn iyo Waqtiga:** Cabashooyinka waxaa si qarsoodi ah u soo gudbin kara qof kasta oo cabanaya, waxaana xogta shaqsiga ah laga dhigaya mid aan la aqoonsan karin dhammaan cabashooyinka la xiriira GBV. Cabashooyinka waxaa lagu aqoonsan doonaa todobaad (7 maalmood) gudahood marka la helo, waxaana la xallin doonaa haddii ay suurtagal tahay, 21 maalmood gudahood, oo ay ku jiraan jawaab celin loogu talagalay cabanaha. Cabashada waxaa si buuxda oo sax ah loogu jawaabi doonaa, iyadoo diiradda la saarayo xaqiiqooyinka iyo dhacdooyinka gaarka ah, la muujinayo faham, islamarkaana aan la iska indhatirin ama la dhimin cabashada.

2.6 **Tacdiyada ka dhanka ah jinsiga "GBV cases"**, Kiisaskan waxaa kaliya maamuli doono khabiirad uxilsaaran ee tababaran oo ku takhasusay maareynta cabashooyinka diiradda saareysa dhibanayaasha, waxaana loola macaamilaya dhibanaha/cabtaha si xushmad iyo qadarin leh . Cabashada waxaa lagu sameyn doonaa si aan loo aqoonsan karin cabtaha, iyadoo lagu muujinayo tixraac/ sumad lagu karto kiiska halkii la sheegi lahaa magaca cabtaha.

**2.7** Mashruucu waxa uu si buuxda u qaadanayaa habka diiradda saara dhibanayaasha, mana jirto wax macluumaad ah oo la shaacin karo iyadoo aan ogolaansho ka helin dhibanaha.

Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqalaha"MOPIED" waxay mas'uul ka noqon doontaa kormeerida xallinta dhammaan cabashooyinka la xiriira hawlaha mashruuca Barwaaqo, iyadoo la raacayo shuruucda FGS, FMS, iyo heerarka deegaanka iyo bulsho ee Bankiga Adduunka, iyadoo loo marayo nidaam cabasho oo si cad loo qeexay oo sharaxaya habka, isla markaana laga heli karo oo loo heli karo dhammaan daneeyayaasha.

Guddiga xallinta cabashooyinka (GRC) ayaa la aas aasay heerarka FMS iyo FGS, waxaana si buuxda u shaqeynaya kanaallada cabshooyinka Mashruuca. Khubarada arrimaha bulshada ee mashruuca ayaa diyaarin doona qoraallada kulammada "meetin minutes" iyagoo raaci doona habka xallinta cabashada. GRC waxay isugu imaan doontaa bil kasta mar si ay u eegaan cabashooyinka yaryar, horumarka laga sameeyay xallinta cabashooyinka, dib u eegista horumarka iyo waxtarka nidaamka cabashada, iyo in la hubiyo in dhammaan shaqaalaha iyo bulshadaba ay ka warqabaan mashruuca.
Cabashooyinka waaweyn ee la xiriira mashruuca, waxaa lagu faahfaahin doonaa buugga nidaamka cabashada (GM manual). Haddii ay jiraan cabashooyin culus ama daran oo khatar ku ah ama dbulshada iyo eegaanka, ama kuwa laga yaabo inay khatar gelin karaan sumcadda mashruuca, khabiirka arrimaha bulshada ee FMS waa inuu si degdeg ah u wargeliyaa khabiirka bulshada ee FGS ama madaxda NPCU, kuwaas oo **48** saacadood gudahood wargelin doona Bankiga Adduunka

sida ku cad Qorshaha ka go'naashiyaha arrimaha Deegaanka iyo Bulshada ee Mashruuca Barwaaqo.
Dhammaan qandaraaslayaasha waxaa looga baahan doonaa in ay wacyigeliyaan shaqaalahooda ku saabsan nidaamka cabashada mashruuca (GM) iyo inay leeyihiin qof diiradda saara oo uqaabilsan soo gudbinta cabashooyinka la xiriira qandaraaska iyo shaqaalahooda, isla markaana ay dejin doonaan hab cabasho oo gaar ah oo loogu talagalay shaqaalaha (sida lagu faahfaahiyay LMP).

## 3. UJEEDDADA HABKA XALINTA CABASHADA

Ujeeddada koowaad ee Habka Cabashada "GM", loo sameeyay , waa : in la dhiso hanaan fahankiisu fudud yahay, degdeg lagu isticmaali karo, la heli karo markasta, caawinaya helida xogta baadhitaanka iyo ka falcelinta cabashooyinka iyo xurgufooyinka ka yimaadda daneeyayaasha mashruuca. Habkan , waxa si gaar ah loogu qaabeeyay in uu siiyo daneeyayaasha goob/ gole ay ku xaliyaan xurguftooda, sidoo kalana dhisa aqoonta ay shaqaalaha mashruucu ku aqoonsadaan, kula socdaan, kuna xalin karaan habka ugu habboon ee mushkiladda markaas aloosan.

Habka Cabashada "GM", wuxuu qurxiyaa, toosiyaa oo tilmaamaa hanaanka hawlaha mashruuca, wuxuuna kor u qaadaa natiijooyinka toggan ee mashruuca biyaha dhulka guntiisa hoose ee Barwaaqo. Marka la tixraaco falanqeynta isbeddellada iyo casharrada laga bartay, habkan waxa laga filayaa in uu ka qeyb qaato horumarinta waxqabadka joogtada ee mashruuca biyaha Soomaliye ee u adkeysiga reer Miyiga BARWAAQO. Waxa muhiim ah in la ogaado, in habkan (GM), aanu caqabad ku ahayn helitaanka adeegyada garsoorka loo siman yahay iyo maamulka. Waxa loo dhigay hab aan diideyn dhaqanka iyo diinta islaamka, waana jid u diyaarsan ka falcelinta baahiyada markaa taagan, iyo u jawaabidda welwelka soo foodsaara dhinacyada mashruucu saameynta ku yeeshay.

**Si kooban**

1. **Khabiiradda cabashooyinka ee heer xaafadeed:** Waxay ka shaqeeyaan cabashooyin yaryar oo lagu xallin karo deegaanka, waxeyna u wargelinayaan khabiirrad arrimaha GBV iyo Bulshada ee FMS iyadoo la isticmaalayo numbarka gaaban (oo diiwaangelin doona iyada oo la adeegsanayo foomka cabashada kobo).
2. **Qandaraaslaha:** Waxey ka shaqeeyaan cabashooyin yaryar oo lagu xallin karo deegaanka waxayna dhammaan cabashooyinka u soo gudbinayaan khabiirka ilaalinta FMS, iyada oo la adeegsanayo numbarka gaaban ee lacag la'aanta ah (oo diiwaangelin doona iyada oo la adeegsanayo foomka cabashada kobo).
3. **Khabiirrada FMS uqaabilsan arrimaha bulshada iyo Deegaanak:** Waxey ka shaqeeyaan cabashooyinka ka dhashay macluumaad la'aan ama arrimo yaryar oo lagu xallin karo deegaanka waxayna dhammaan cabashooyinka ku soo gudbinayaan marka hore iyada oo la adeegsanayo numbarka gaaban ee lacag la'aanta ah (oo diiwaangelin doona iyada oo la adeegsanayo foomka cabashada ODK/kobo), inkastoo qandaraaslayaashu laga yaabo inay si toos ah u sameeyaan mustaqbalka haddii ay fududahay.

4. **Khabiiradda cabashooyinka ee Social/ GBV ee FMS:** Waxay u gudbiyaan dhammaan cabashooyinka xoghayaha guddiga xallinta cabashooyinka. Khabiirka GBV wuxuu bixiya macluumaad ku saabsan adeegyada GBV haddii ay jiraan, waxaana uu si degdeg ah ula xiriiraa khabiiradda GBV ee FGS.
5. **Khubaradda arrimaha bulshada/GBV ee FGS:** Waxay u gudbiyaan dhammaan cabashooyinka aan la xallin ama kuwa culus xogheynta guddiga xallinta cabashooyinka ee Social. Khabiiradda GBV waxey la xiriiri doontaa khabiir WB GBV si uu u ogaado habka loo maareeyo cabashooyinka GBV/SEAH.
6. **Maareeyaha/ Xiriiriyaha Mashruuca:** Waxey si toos ah u helaan dhacdooyinka culus waxeyna u gudbiyaan WB TTL **48** saacadood gudahood. Waxay madax ka yihiin GRC-da FGS waxayna kormeerayaan dhaqangalka nidaamka cabashada.

**Lambarada Gaaban ee Mashruuca BARWAAQO:** Khubarada arrimaha bulshada ”Social” ayaa mas'uul ka ah numbarkan, diiwaangelinta cabashooyinka kobo iyo buugga Excel, u gudbinta kiisaska hay'adaha ama shaqsiyaadka saxda ah, iyo raacinta xallinta iyo jawaab celinta cabtaha (21 maalmood gudahood). Haddii khabiirka aanu joogin ama uu fasax ku maqanyahay, khabiirka GBV ayaa mas'uul ka noqon doona ka jawaabidda wicitaannada iyo buuxinta diiwaanka . Kahor inta aan la hawlgelin khadka taleefanka, khabiirka bulshada,GBV, iyo shaqaalaha kale ee PIU ayaa lagu tababari doonaa nidaamka cabashada (GM), diiwaangelinta cabashooyinka, maareynta kiisaska GBV ee soo gala khadka taleefanka, gudbinta adeegyada GBV, iyo xirfadaha maareynta wicitaanka. Lambarka gaaban ayaa shaqeyn doona 24 saacadood. Khubarada bulshada iyo GBV ayaa mas’uul ka ah ka jawaabidda wicitaanka, iyo GRC-da oo ka qeyb qaadan doonta xallinta kiisaska ayaa dhammaantood saxiixi doonanan heshiis ku qotoma ilaalinta xogta si ay uga ilaaliyaan cabtaha dhibaato ka soo gaarta cabashadiisa.

## <u>Diiwaangelinta Cabashada</u>

| Heerka | Habka loo soo gudbiyo | Xaallinta | Noocyada cabashooyinka lagu Maareeyo | Wacyigelin |
|---|---|---|---|---|
| Heer Tuulo/Xaafad qofka uqaabilsan | Taleefan ama si toos ah | Xallinta (iyadoo lala kaashanayo VDC) ama u gudbinta khabiirka heer FMS | Cabashooyin yaryar oo si fudud loo xallin karo, gaar ahaan macluumaad ama isbedelada qandaraaslaha | Af ahaan kulammada bulshada Waraaqo daabacn xarunta bulshada ama meel dhexe |
| **Qandaraaslayaasha** Kormeeraha goobta ama qofka loo magacaabayTaleefan ama si toos ah | Taleefan ama si toos ah | Xallinta ama u gudbinta khabiirka heer FMS | Arrimo yaryar, waxaa lagu saxaa si waafaqsan ESMP sida trafiic IWMS | Wareejinta Siteka iyo kulanka heer bulsho |
| ***Hay’adaha Fulinta FMS /Qandaraslayaasha*** | Taleefan ama si toos ah | | | |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| ***Heer FMS: social spe*** iyo PM and GRC, GBV cabshooyinka la xiriira GBV | Taleefan/Email ama Lambarka Gaaban | Waxaa xallinya PM /Guddiga GRC amd waxaa loo gudbinaa FGS | Cabshooyinka dhmaantood waa in lagu xiraa GEMS.Macluumaatka la soo dejiyaa bil kasta in lagu shubaa diiwaanka kaasoo loo diri doono FG Social iyo FMS PM. | Guudmar xafiisyada FMS Iyo Poster/waraaqo daabacan oo la dhigo goob dadweyne iyo meertada FMS |
| **Heer FGS:** Khabiirka Arrimaha bulshada (iyadoo lala kaashanayo PM iyo GRC), iyo kahbiir GBV ee cabashooyinka la xiriira GBV | Taleefan ama si toos ah | Xallinta (iyadoo lala kaashanayo PM iyo GRC) iyo wargelinta WB (si degdeg ah ama warbixin saddexdii biloodba mar). | | Guudmar xafiiska FGS iyo iyo Poster/waraaqo daabacan oo la dhigo goob dadweyne iyo website-ka FGS. |

## 4. Habka Cabashada ee Bankiga Adduunka:

***Bankiga Adduunka Soomaaliya:*** *Haddii cabasho lagu soo gudbiyay NPCU, isla markaana aan jawaab ku qanacsan la helin, emayl ayaa lagu soo diri karaa somaliaalert@worldbank.org.*

***Adeegga Xallinta Cabashooyinka ee Bankiga Adduunka:*** *Haddii aan jawaab laga helin xafiiska Bankiga Adduunka ee Soomaaliya, cabashada waxaa lagu soo gudbin karaa Adeegga Xallinta Cabashooyinka ee Bankiga Adduunka iyadoo la adeegsanayo emaylka grievances@worldbank.org. Wixii faahfaahin ah, booqo: http://www.worldbank.org/grso*